

# Tallaalka Novavax ee COVID-19: Waxa Ay Tahay Inaad Ogaato

**Vaccinate WA**  
CovidVaccineWA.org

## Waa maxay tallaalka Novavax?

Tallaalka COVID-19 ee ugu dambeeyay ee Food and Drug Administration (FDA, Maamulka Cuntada iyo Daawooyinka) ay oggolaatay, Novavax, wuu ka duwan yahay marka loo eego tallaallada kale ee COVID-19 ee hadda laga heli karo Maraykanka. Novavax waa tallaalka qayb hoosaad ka mid ah borotiinka kaas oo isticmaala isla, muddada dheer la isticmaalayey, tignoolajiyada lagu arko tallaallada kale ee sida aadka loo isticmaalo sida HPV, cagaarshowga B, iyo hargabka. Novavax waa taxane laba garoojo ah oo la bixiyo waqti ay u dhexeyso 21 maalmood, oo ay heli karaan kuwa da'doodu tahay 12 sano jir iyo ka weyn.

## Novavax waa tallaalka unugyo hoosaadka borotiinka ee soo jireenka ah.

In kasta oo mid kasta oo ka mid ah tallaallada la oggolaaday uu ka shaqeeyo inuu ka caawiyo nidaamka difaaca jirkeena inuu aqoonsado oo uu weeraro fayraska COVID-19, Novavax waxay isticmaashaa tignoolajiyad tallaalka oo qadiim ah, oo aad caan u ah.



- Unug hoosaadka borotiinka tallaallada COVID-19 waxay ka kooban yihiin qaybo ka mid ah (borotiin) fayraska sababa COVID-19
- Waxay sidoo kale ka kooban yihiin wax lagu daro oo ay la socdaan dufano iyo sonkor loogu talagalay in lagu caawiyo nidaamka difaaca jirka si uu uga jawaabo fayraska oo uu ku ilaaliyo mustaqbalka
- Kuma jiro mRNA

## Waxyeelada ka dhasha Novavax waxay caddaynayaan inay yar yihiin.

Waxyeelooyinka ka dhasha Novavax ee ku meel gaadhka ah kama duwana waxyeelada caadiga ah ee lagu arko tallaallada kale ee COVID-19. Xanuun/jilicsanaan, guduudasho iyo barar dhinaca lagaa duray, iyo sidoo kale daal, murqo xanuun, madax-xanuun, kala-goysyo xanuun, lallabbo/matag, iyo xumaad. Tallaalada COVID-19 ee unug hoosaadka borotiinka ma sababi karaan COVID-19 ama cudurro kale.

## Waa maxay waxay xogtu muujinayso?

Daraasadaha tijaabada caafimaad ee la sameeyay guggii 2021 ayaa muujiyay in tallaalka Novavax uu soo bandhigay 90% inuu waxtar u leeyahay joojinta caabuqyada COVID-19 iyo 100% inuu waxtar u leeyahay kahortaga dhimashada la xiriirta COVID-19.

Tallaalka ayaa la sheegay inuu keenay jawaabcelin ballaaran oo difaac ah oo ka dhan ah dhammaan noocyada COVID-19, oo ay ku jiraan BA.5, marka loo eego tijaabooyinka socda. Tallaalada qayb hoosaadka sida Novavax ma isticmaalaan wax fayras ah oo nool mana beddeli karaan ama mana saameyn karaan hiddo-sideyaasheena. Waxaan sidoo kale ogaanay in Novavax:



- Si wax ku ool ah looga isticmaalay wadamo kale oo badan, oo ay ku jirto Kanada, tan iyo 2021-kii
- Aysan ku jirin maaddooyinka loo isticmaalo tallaallada kale ee sababa kicinta xasaasiyadda
- Waxaan sidoo kale barannay in Novavax: Ay isticmaasho isla tignoolajiyada la yaqaano ee loo isticmaalay tallaallada caanka ah sida hargabka, HPV, cagaarshow B, iyo busbuska

Novavax waxaa uu soo maray hannaanka Emergency Use Authorization (EUA, Oggolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah) ee FDA waana ikhtiyaar sax ah, gaar ahaan kuwa raadinaya beddelka [tallaallada mRNA](#).

Kuurooyinka dheeraadka oo kooxaha kale ah ayaa laga yaabaa in lagu taliyo mustaqbalka.

## Tallaalka ayaa wali ah dookha ugu wanaagsan.

Maadaama COVID-19 uu sii jiro, ikhtiyaaro badan oo tallaalka ah ayaa la helay. Waa muhiim in la xasuusto in la tallaalay ayaa ugu wanaagsan tahay. Ayadoo aan loo eegin summada tallaalka, tallaalku waa difaacga ugu fiican ee ka hortaga COVID-19 iyo saameyntiisa. Kala hadal tallaalka bixiyahaaga midka uu yahay ikhtiyaarka adiga kugu habboon.